# WASAARADDA MAALIYADDA

## Mashruuca Kor U Qaadidda/Kobcinta Maaraynta[1] Khayraadka Dowladda EE Soomaaliya MKMKDS (P177298)

## QABYO-QORAAL

## QORSHAHA U HEELLANAANTA[2] DEEGAANKA IYO ARRIMAHA BULSHADA (QUHDAB)

1. Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya ("oo ah dalka helay deeqdan ama manaafacaadsanaya") iyada oo loo soo mariyey Wasaaradda Maaliyadda (WM), waxa ay hir-gelindoontaa Mashruuca Kor u Qaadidda/Kobcinta Maaraynta Khayraadka Dowladda ee Soomaaliya **(P177298) (**ee loo garan-ogyahay "Mashruuca" ama "MKMKDS"). Ururka Horumarinta ee Caalamiga ah UHC (ee loo garan-ogyahay "Ururka" waxa uu yeelay/aqbalay in uu maalgeliyo mashruucan.
2. Dowladda heshay deeqdan waa in ay hirgelisaa hawlo iyo tallaabooyin maadiya si mashruuca loogu hirgeliyo si waafaqsan halbeegyada u degsan Deegaanka iyo Arrimaha Bulshada (DAB) ee Bangigaga Adduunka. Qorshaha U Heellanaanta (u hagarbixidda) Deegaanka iyo Arrimaha Bulshada (QUHDAB) waxa uu dejiyey hawlo iyo tallabooyin maadiya, nuqullo ama qorshayaal cayiman iyo sidoo kale xilliga mid walba lagu qabanayo.
3. Dowladda heshay deeqdan waxa ay u hogaansami doontaa shuruudaha ku jira nuqulada kale ee Qaab-dhismeedka Deegaanka iyo Arrimaha Bulshada ee laga rabo sida ku cad (QDAB), iyada oo la tixraacayo Qorshaha U Heellanaanta (u hagarbixidda) Deegaanka iyo Arrimaha Bulshada (QUHDAB) oo uu ku jiro Qorshaha Ka soo Qeyb-gelinta Daneeyayaasha ee Wax-ku-oolka ah (QKQDW), Qorshaha Maamulidda Deegaanka iyo Arrimaha Bulshada (QMDAB) oo uu ku jiro Habraaca Maamulidda Shaqaalaha (HMS), Qorshaha Maamulidda Amniga, iyo Qorshaha Waxqabad ee ka Hortagidda iyo Ka Jawaabidda Xadgudubyada, Si Xun Uga Faa'idaysiga iyo Guulguulidda (qashqashaada) Arrimaha Jinsiga ah iyo Qorshaha Maamulidda Deegaanka iyo Arrimaha Bulshada (ESMP).
4. Dowladda heshay deeqdan waxa ay mas'uuliyadi ka saarantahay in ay u hogaansanto dhammaan shuruudaha ku jira Qorshaha U Heellanaanta (u hagarbixidda) Deegaanka iyo Arrimaha Bulshada (QUHDAB) xataa, marka hawlo iyo tallaabooyin cayiman ay hirgelinayso wasaarad, wakaalad ama waax, sida lagu sheegay qodobka 1aad ee xagga sare ku xusan.
5. Hirgelinta hawlaha iyo tallabooyinka maadiga ah ee lagu sheegay Qorshaha U Heellanaanta (u hagarbixidda) Deegaanka iyo Arrimaha Bulshada (QUHDAB), waxa dabo-galkiisa iyo warbixintiisaba ay dowladda deeqdan heshay u

[1] "Maamulidda" ayaa ah erey kale oo u dhigma "maaraynta"
[2] "U hagarbixidda" ayaa ah erey kale oo u dhigma, "u heellanaanta" (commitment).

gudbinaysaa Ururka, sida uu ka rabo Qorshaha U Heellanaanta (u hagarbixidda) Deegaanka iyo Arrimaha Bulshada (QUHDAB) iyo shuruudaha ku xusan heshiiska sharci, Ururkuna waxa uu ku dabogeli doonaa oo uu qiimayn doonaa horumarka iyo dhammaystirka hawlaha iyo tallaabooyinka maadiga ah inta mashruuca hirgelintiisu ay socoto.

6. Sida ay isku-afgarteen (ku heshiiyeen) Ururka iyo Dowladda deeqdan heshay, waxa ay xilliga ugu habboon wax-ka-beddel iyo dib-u-eegis ku samaynayaan Qorshaha U Heellanaanta (u hagarbixidda) Deegaanka iyo Arrimaha Bulshada (QUHDAB) inta mashruuca fulintiisu ay socoto, si ay uga tarjunto is-bedellada maamul ee lagu sameeyay mashruuca iyo duruufaha aan la sii hilaadin/odorosin, ama iyada oo laga jawaabayo qiimaynta ka soo baxday howl-gudahsada mashruuca ee la sameeyay si waafaqsan Qorshaha U Heellanaanta (u hagarbixidda) Deegaanka iyo Arrimaha Bulshada (QUHDAB). Marka duruufahan/xaaladahan oo kale ay soo baxaan, dowladda deeqdan heshay oo mas'uul uu ka yahay (u xilsaaranyahay) Wasiirka Maaliyaddu waxa is-bedellada la sameeyay uu ku raaci doona Ururka, isaga oo hagaajinaya Qorshaha U Heellanaanta (u hagarbixidda) Deegaanka iyo Arrimaha Bulshada (QUHDAB), si uu uga tarjumo is-bedellada la sameeyay. Heshiiska ku saabsan is bedellada lagu sameeyay Qorshaha U Heellanaanta (u hagarbixidda) Deegaanka iyo Arrimaha Bulshada (QUHDAB) waa la qori doonaa iyada oo la is-weydaarsanayo qoraallo ay kala saxeexanayaan Ururka iyo Dowladda heshay deeqdan oo uu u xilsaaranyahay Wasiirka Maaliyaddu. Wasiirka Maaliyaddu (WM) waxa uu si dhakhso leh u shaacinayaa/daaha-uga-rogayaa Qorshaha U Heellanaanta (u hagarbixidda) Deegaanka iyo Arrimaha Bulshada (QUHDAB) ee la hagaajiyay, isaga oo laga heli karo mareegta dowladda.
7. Haddii mashruuca is-beddel ku yimaaddo, ama duruufo aan lagu sii talogelini (aan la sii hilaadin/odorosin) ay yimaaddaan, ama howl-gudashada mashruuca natiijadiisu ay is-beddel ku keento khataraha iyo saamaynta (raadka uu ka tagayo) inta lagu gudo-jiro hirgelinta mashruuca, dowladda heshay deeqdan, waxa saaran in ay bixiso wixii kharash dheeraad ah, haddii loo baahdo (laga fursanwaayo), si loo fuliyo howlo iyo tallabooyin lagu xallinayo (lagula tacaalayo) khatarahan iyo saamaynahan, oo ay ku jiraan saamayno ku iman kara dhanka bedqabka, caafimaadka iyo deegaanka, shaqaalaha oo xad-dhaaf u bata, ama uu dhaco Xadgudub ku Salaysan Jinsiga (XKSJ), ama Tacaddi iyo Si Xun Uga Faa'idaysi Dhanka Jinsiga ah[3] (TSXUFDJ).

[3] Ereyga "faro-xumayn xooggan ayaa ugu dhowaan u dhigma kara Tacaddiyada iyo Si Xun Uga Faa'idaysiga Dhanka Jinsiga ah (TSXUFDJ).